

## **Xogta xiriirka**

Sofia Blomqvist, telefoon: 031-755 36 95  
[sofia.blomqvist@stadsmissionen.org](mailto:sofia.blomqvist@stadsmissionen.org)

Lars Eriksson, telefoon: 031-755 36 93  
[lars.eriksson@stadsmissionen.org](mailto:lars.eriksson@stadsmissionen.org)

Louise Gunnarsson, telefoon: 031-755 36 72  
[Louise.gunnarsson@stadsmissionen.org](mailto:Louise.gunnarsson@stadsmissionen.org)

Jonas Lindholm, telefoon: 031-755 37 51  
[jonas.lindholm@stadsmissionen.org](mailto:jonas.lindholm@stadsmissionen.org)

Telefoonka sii xiriirinta: 031-755 36 00

## **Wakhtiyada ay furan tahay**

Waxaan furanahay maalintii maalmaha shaqada.

Waxaan ugu horreyn qaabilnaa kulmada horay loo ballansaday. Kulamada kediska ah waxaa qaabilnaa haddii wakhti loo helo.

## **Cinwaanka:**

Stadsmissionens vägledning  
Drottninggatan 33  
411 14 Göteborg



# **Jihaynta Stadsmissionen**



### **Waa maxay jihaynta Stadsmissionen?**

Jihaynta Stadsmissionen waxay ku socotaa adiga ku nool xaalad adag oo aad rabtid inaad wax ka beddeshid – laakiin aadan garanayn waxaad samayn lahayd. Su´aaluhu waxay noqon karaan kuwo badan;

- Xagee u irkanayaa markii aan guri la´aan noqdo ama halis ugu jiro
- in guriga la iga saaro?
- Sidee kaalmo dhaqaale uga codsan karaa
- xafiiska adeegga bulshada?
- Sidee deyn iska nadiifintu u dhacdaa?
- Yaa iga caawin kara inaan shaqo codsado ama helo
- waxbarasho?
- Ilmahaygu wuxuu u baahan yahay taageero, xagee waalid ahaan caawinaad ka heli karaa?

Si wadajir ah baan u xallin doonnaa su´aalahaaga.

### **Caawinaad see ah baad heli kartaa?**

Taageerada waxaa la waafajinayaa hadba waxaad caawinaad ugu baahan tahay si wadajir ah baana qorshe u dejjinaynaa. Qayb ka mid ah shaqada jiheeyaha waxay ka socotaa inuu kaa caawiyo la xiriiridda xafiiska adeegga bulshada, Qasnadda caymiska guud (Försäkringskassan) ama daryeelka caafimaadka. Taasi waxay la micne tahay inaan kuu raacayno kulamada ama aan wada wacayno.

U fiirso inaysan jirin wax guryo ama meelo la dego aan leenahay. Ma haysanno sidoo kale lacag aan qaybinno.

### **Sidee ula xiriiri karaa?**

Waxaa noola xiriiri kartaa siyaabo badan:

- Boggeena waxaad ka helaysaa foom nala kala soo xiriiro karo. Waxaad halkaa ku sharixi kartaa waxaad caawinaad ugu baahan tahay markaas baan kula soo xiriiri doonnaa [www.stadsmissionen.org](http://www.stadsmissionen.org) – ku raadi Vägledning
- Naga soo wac lambarradeena tooska ah ama lambarka sii xiriirinta – xogta xiriirka bogga dambe bay ku qoran tahay.

Waxaan qaban karnaa turjumaan haddii aad u baahan tahay.

Si diirran ugu soo dhawow inaad nala soo xiriirtid!